

## Heerka labaad ee dib-u-furista bulshadu wuxuu dhacayaa 27-ka maajo

Heerka labaad ee dib-u-furidda bulshada ayay dawladda u gudbaysaa saqda dhexe habaynka khamiista ee 27-ka maajo. Laga billaabo markaas waxaa kulmi kara dad ka badan inta hadda, xannaanooyinka carruuraha iyo iskoollada meelaha cudurku ku yar yahay na waxay geli karaan tillaabooyinka heerka cagaaran. Laga billaabo maanta dadka lagulama talinayo in ay iska dhaafaan safarrada waddanka gudihiisa ah.

- Waxaan aragnaa in ay yaraadeen dadkii isbataallada la dhigayay. Tirada dadka cudurka qaadayana way xasilloon tahay. Boqolkiiiba 36 dhammaan dadka ka weyn 18 sano ayaa hadda qaatay tallaalkii koowaad. Tallaalistu sidii loogu tala galay ayay ku socotaa. Dawladdu kaddib markii ay qiimayn guud samaysay waxay u aragtaa in ay macquul tahay in loo gudbo heerka labaad ee dib-u-furidda Norway. Hawlaha Norway dib loogu furayo ayaan hadda dardar gelin karnaa, ayay tiri raysalwasaare Erna Solberg.

Go'aanka loogu gudbayo heerka labaad wuxuu ku salaysan yahay talooyinkii ay soo jeediyeen Agaasinka caafimaadka iyo Machadka caafimaadka dadweynaha.

In kasta oo aan hadda debcinnay tillaabooyinka heer qaran, waa in aan taxaddar muujinnaa. Cudurka oo meelaha qaar ka dillaaca dabadeed na is-qaadsiintu ku badato ayaa keenaya in loo baahan yahay in ay xeerar adag deegaannada ka jiraan. Taas oo ka dhigan in diyaar loo ahaado in ay weli tillaabooyin kala duwan dalka dhexdiisa ka jiri karaan.

- Marka aan hadda dalka dib u furayno, waxaa muhiim ah in ay degmooyinku helaan wakhti ay ku qiimeeyaan in deegaankooda looga baahan yahay xeerar adag si faafidda cudurka loo xakameeyo. Waana midaas sababta ay is-beddelladu u dhaqangelayaan 27-ka maajo, ayay raysalwasaaruuhu tiri.

Is-beddello aan badnayn ayaa lagu samaynayaa heerarka [gorshaha dawladda ee dalka tartiib-tartiib dib loogu furayo](#). Heerarka 3-aad iyo 4-aad ayaguna waa sidoo kale.

### **Xannaanooyinka carruuraha iyo iskoollada waxaa laga dhigayaa heer cagaaran**

Ilaa iyo hadda go'aanku wuxuu ahaa in ay dhammaan xannaanooyinka carruuraha iyo iskoolladu ku jiraan heer jaalle ah. Laga billaabo 27-ka maajo degmooyinka ayagaa go'aansanaya heerka tillaabooyinka ee ay iskoollada iyo xannaanooyinka carruuruuhu gelayaan, taas oo ku salaysnaan doonta xaaladda faafidda cudurka ee deegaankaas ka jirta. Taas oo la mid ah in ay degmooyinka uu cudurku hadda ku yar yahay ka fikiri karaan in ay u gudbaan heerka cagaarka ee nidaamka midabbada nalalka taraafikada (trafikklysmodellen).

- Marka ay dawladdu dib u furayso Norway, waxaan mudnaanta siinaynaa carruurta iyo dhallinyarada. Waxay la kulmi doonaan tillaabooyin ka debecsan kuwa dadka waaweyn. Heerka labaad ayaa maalinta xannaanooyin carruureed iyo iskoollo badan ka dhigaya mid caadigii u dhow. Ardayda waxbarashada sare dhigata waxaa loo oggolaanayaa in ay goobaha waxbarashada tegi karaan in intii hore ka badan, si ay goobahaas u tagaan oo u helaan waxbarashada ugu fiican ee suurtaggalka ah - ayay tiri Guri Melby oo ah wasiirka waxbarashada- iyo is-dhengalka.

In loo gudbo heerka cagaaran waxay ku xiran tahay in uu cudurku in muddo ah degmada ku yaraa islamarkaana ay degmadu awooddo in dadka si fiican loo tijaabiyo loolana socdo tirada dadka cudurka qaaday. Waxaa sidoo kale degmooyinka looga baahan yahay in ay leeyihii qorshe wanaagsan oo dib loogu noqonayo tillaabooyinka heerka jaallaha ama guduudan.

Si ardayda loogu oggolaado in ay jaamacadaha iyo machadyada dib ugu laabtaan waxaa la soo rogayaa in joogto tijaabo looga qaado islamarkaana la diiwaangeliyo dadka goobjoogga ah si loo fududeeyo hawsha raadraaca cudurka.

### **Firfircoonda wakhtiga firaaqada la yahay**

Tirada dadka 20 sano ka weyn ee ka qaybqaadan kara tababbarka abaabulan ee ciyaaraha guud, dhaqanka- iyo firfircoonda wakhtiga firaaqada la yahay waa la kordhinayaa: 10 qof bay ahayd, waxaa laga dhigayaa 20 qof marka gudaha la

joogo, marka dibedda la joogana 20 qof bay ahayd – waxaa laga dhigayaa 30 qof. Dhawr kooxood ayaana isku mar tababbaran kara, laakiin waa in aysan kooxaha kala duwan is dhex gelin.

### **Qabanqaabooyinka**

Heerka 2-aad intii hore in ka badan ayaa ka qaybqaadan kara qabanqaabooyinka loogu tala galay carruurta iyo dhallinyarada. Ilaa iyo 100 qof ayaa ka qaybqaadan kara qabanqaabooyinka gudaha ka dhaca ee ay isugu yimaadaan dad ka yar 20 sano oo isku degmo ah.

– Wuxaan ku faraxsanahay in aan hadda carruurta iyo dhallinyarada u fududaynayno in ay kulmi karaan oo firfircooni samayn karaan. Shardi ma aha in ay isku degmo ku nool yihii. Taas oo ka dhigan in carruurta iyo dhallinyarada degmo ku nool laakiin tababbar iyo wixii la mid ah la sameeya urur, naadi ama koox ka tirsan degmada deriska la ah oo kale – waa ay ka qaybqaadan karaan qabanqaabooyinka ururkaas ka jira degmada, ayuu yiri Kjell Ingolf Ropstad oo ah wasiirka qoyska- iyo carruurta.

Qabanqaabooyinka guud ee gudaha ka dhaca waxaa la kordhinayaa dadka ka qaybqaadan kara ayaga oo aan lahayn goobo fadhi oo joogto ah oo loo tilmaamay – waxaa la oggolaa 10 qof waxaana laga dhigayaa 50 qof. Isu imaatinnda gaarka ah ee aan ka dhicin guryaha gaarka ah, ardaayada iyo guri-fasaxeedyada – tirada dadka joogi kara marka ay gudaha ka dhacayaan ayaa la kordhinayaa. Waxay ahayd 10 qof, waxaana laga dhigayaa 20 qof. Dibeddana waxay ahayd 20 qof, waxaana laga dhigayaa 30 qof. Waxay arrintani tusaale ahaan khusaysaa gole la kireystay ama goob dadweynaha ka dhaxaysa. Guryaha gaarka ah tirada dadka la iskula taliyo in ay qofka soo booqan karaan oo ahayd shan qof waa la kordhinayaa oo waxaa laga dhigayaa tobant qof, ilaa iyo inta la kala fogaan karo masaaf 1 mitir ah.

Marka guryaha la isku booqanayo, [dadka difaacan \(Lovdata\)](#) laguma darayo tirada loo baahan yahay in aan laga badnaan. Laakiin kuwa aan difaacnayn waa in ay weli kala fogaan karaan.

Bandhigiyada iyo suuqyada ku-meelgaarka ah hadda loo arki maayo sidii in ay qabanqaabo yihii ee waxaa loo arkaya si la mid ah sida suuqyada waaweyn.

### **Safarrada waddanka gudihiisa**

Waddanka gudihiisa hadda waa lagu safri karaa, laakiin waxaa muhiim ah in safarka si fiican loo qorsheeyo si aan cudurka loogu faafin meelaha loo kala safrayo. Taas oo weliba si gaar ah muhiim ugu ah dadka ka safraya meelo uu cudurku ku badan yahay.

Dadka [difaacan \(Lovdata\)](#) ee ku nool degmo ku hoos jirta tillaabooyin adag ee u safra degmo ku jirta tillaabooyin kuwaas ka debecsan, ma raacayaan talooyinka iyo xeerarka ka jira degmada ay ku nool yihiin.

Talooyinkaan safarrada gudaha ee wax laga beddelay isla maantaba waa dhaqangelayaan maaddaama aysan degmooyinka uga baahnayn qiimayn iyo diyaargarow midna.

### **Iibinta khamriga**

Wakhtiga joojinta gelitaanka- iyo iibinta khamriga waa la dheeraynayaa oo waxaa laga dhigayaa saacadda 24.00, shuruuddii ahayd in khamriga cunto lala iibsadana meesha waa laga saarayaa. Laakiin shuruuddii ahayd in miis la haysto iyo in hal mitir la kala fogaado weli waa sideedii.

### **Tijaabada**

Waxay dawladdu oggolaanaysaa in tijaaba-qaadista lagu badiyo meelaha dib-u-furiddu keenayso in cudurku faafo, weliba meelaha ay muddo dheer ka jireen tillaabooyin adag.

- Waxaan eegaynaa in aan samayno nidaam ganacsatada loogu adeegsan karo in ay tijaabada qaadaan, si ay u fududaato in dad badan la tijaabiyo sida in tusaale ahaan la badiyo dadka qabanqaabada jooga. Waxay nala tahay in ay dawladdu bixiso kharashka ku baxaya arrintaan, ayay tiri Guri Melby.

Shuruudaha tijaabadana wax baa laga beddelayaa oo degmooyinku waxay dadka tijaabo ka qaadi karaan ayaga oo aan uga shakiyin in ay cudurka qabaan. Degmooyinka waxa markaa suurtaggal u ah in ay fursadaha tijaabo-qaadista ee ka bannaan u isticmaalaan ujeedooyinkan cusub.

- Tijaabo-qaadista badan waxaa kale oo laga fulin doonaa goobaha laysugu yimaado wakhtiga firaaqada la yahay- iyo goobaha ilaalinta caafimaadka dhimirka iyo daryeelka mukhaaddaraadka, iyo goobaha shaqada ee shaqaaluhu dadka badan la xiriiraan. Marka iskoolladu xiran yihiin si joogto ah ayaa dadka

loo tijaabin doonaa si carruurta iyo dhallinyarada loogu furo firfircoonda ay ka midka yihiin iskoollada xagaaga la tago iyo firfircoonda xagaaga, ayuu yiri Kjell Ingolf Ropstad.

### **Ciyaaraha sare**

Ciyaaraha sare ayaa ah qayb cusub oo ka mid ah qorshaha dib-u-furidda dalka. Heerka 2-aad waxaa lagu oggolaanaya ciyaaraha tababbarka ee horyaalka PostNord ee kubbadda cagta iyo horyaallada ciyaaraha sare ee hadda ka hor xirnaa. Ciyaaraha tartanka ee horyaalladaas ayay dawladdu oggolaan doontaa saddex toddobaad kaddib 27-ka maajo, haddii ay khibradda laga helo ciyaaraha tababbarka iyo xaaladda faafidda cudurku taas oggolaadaan.

### **Qeexid**

#### **Dadka tallaal buuxa qaatay:**

- Dadka laba jeer la tallaalay, oo ka billaabanyasa 1 toddobaad tallaalidda labaad kaddib.
- Dadka uu ku dhacay cudurka covid-19 oo hal tallaal lagu duray ugu yaraan 3 toddobaad kaddib markii tijaabada laga qaaday, oo ka billaabanyasa 1 toddobaad tallaalidda kaddib.
- Dadka tallaalki koowaad qaatay, oo hab shaybaar oo la aqoonsan yahay lagu baaray laguna caddeeyay in uu covid-19 qabo ugu yaraan 3 toddobaad tallaalista kaddib, kana baxay gooni isu soociddi.

#### **Difaacan:**

- Dadka tallaal buuxa qaatay
- Dadka qaatay tallaalkii koowaad, taas oo soconaysa 3-15 toddobaad tallaalista kaddib.
- Dadka uu ku dhacay cudurka covid-19 taas oo socanaysa laga billaabo markii gooni isu soocidda laga baxay ilaa 6 billood kaddib markii tijaabada looga qaaday hab shaybaar oo la aqoonsan yahay.

## **Tillaabooyinka heer qaran ee soo socda ayaa la raacayaan laga billaabo 27-ka maajo:**

### **Talooyin dalka oo dhan khuseeya**

Dadka ka fogow 1 mitir. Gacmuuhu nadiif ha ahaadeen. Guriga joog haddii aad xanuunsan tahay.

#### **Is-dhexgalka dadka**

- Yaysan ku soo booqan dad ka badan toban qof. (Qodob cusub)
- Haddii ay martidu kulligood isku guri ka yimaadeen intaas waa laga badnaan karaa, laakiin waa in la kala fogaan karo.
- Waxaa la isku boorrinayaa in dibedda lagu kulmo.
- Carruurta dhigata xannaannada carruurta iyo iskoollada way soo booqan karaan kuwa ay isku kooxda joogtada ah yihiin (kohort).
- Marka guryaha la isku booqanayo tirada xaddidan lagu dari maayo [dadka difaacan \(Lovdata\)](#), laakiin weli waxaa loo baahan yahay in ay kala fogaan karaan kuwa aan [difaacnayn \(Lovdata\)](#). (Qodob cusub)

#### **Safarrada**

- Waxaa lagu talinayaa in aan dibedda loo safri. Safarrada aadka lagama maarmaanka u ah waa la aadi karaa.
- Waddanka gudihiiisa waa loo safri karaa. Kuwa aan difaacnayn waa in ay taxaddar dheeraad ah muujiyaan oo ay safarka horey u sii qorsheeyaan si ay ilaa inta suurtaggalka ah uga baaqsadaan in ay cudurka gudbiyaan. Waxay tani weliba si gaar ah u khusaysaa dadka ka safraya meelo uu cudurku ku badan yahay. (Qodob cusub)
- Dadka u safra degmooyin ay ka jiraan tillaabooyin ka debecsan kuwa degmada ay caadi ahaan ku nool yihiin waxay raacayaan talooyinka degmada ay ku nool

yihii. Tani ma khuseyso dadka [difaacan \(Lovdata\)](#). (Qodob cusub)

### **Iskoollada iyo xannaanooyinka carruuraha**

Xannaanooyinka carruuraha iyo iskoolladu waxay raacayaan heerarka tillaabooyinka cagaarka, jaallaha iyo guduudka ee nidaamka midabbada nalalka taraafikada ee ay degmada gaarka ah soo rogto. Waa la joojiyay go'aankii heer qaran ee xannaanooyinka carruuraha iyo iskoollada oo dhan lagu geliyay heerka jaallaha ah. (Qodob cusub)

### **Waxbarashada sare**

- Goobaha waxbarashada oo la tegayo in ka badan intii hore iyo qaadista tijaabooyinka oo la badaniyo. (Qodob cusub)
- In la diiwaangeliyo dadka goobjoogga ah iyo kuraasta ay fadhiyaan si raadraaciddu u fududaato. (Qodob cusub)

### **Shaqada**

- Guriga ha ku shaqeeyaan dhammaan dadka awooda iyo/ama wakhtiyoo kala duwan shaqada ha la tago.

### **Ganacsiga**

- Ha furnaado ayada oo la hirgelinayo tillaabooyinka ka hortagga cudurrada, eeg heerka laamaha ganacsiga iyo xeer-hoosaadyada khuseeya.
- Bandhigyada badeecooyinka iyo suuqyada ku-meelgaarka ah loo arki maayo sidii in ay qabanqaabo yihii ee waxaa loo arkayaan sida goobaha ganacsiga. Waxaa sidoo kale laga doonayaa in ay diiwaangeliyaan meelaha lagala xiriira karo macaamiisha kuwooda oggolaada. (Qodob cusub)

### **Ciyaaraha- iyo firfircoonda wakhtiga firaaqada la yahay**

- Dadka ka weyn 20 sano way ka qaybqaadan karaan firfircooni abaabulan sida tababbarka iwm. Gudaha haddii la joogo waxaa la ahaan karaa ilaa iyo 20 qof, ilaa iyo inta ay kala fogaan karaan masaafu hal mitir ah. (Qodob cusub).

- Dadka ka weyn 20 sano way ka qaybqaadan karaan firfircooni abaabulan oo dibedda ka dhacda ayaga oo ah kooxo gaaraya ilaa iyo 30 qof, ilaa iyo inta ay kala fogaan karaan ugu yaraan hal mitir. (Qodob cusub)
- Dhawr kooxood waa joogi karaan isku goob tababbarasho haddii aysan kooxuhu is dhexgelin oo ay markaas gooni-gooni iyo si guud ba u ilaalin karaan talooyinka ka hortagga cudurrada.
- Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 20 sano way tababbaran karaan oo ka qaybqaadan karaan firfircoonda wakhtiga firaaqada la yahay, isboortiga-, iyo dhaqanka, waana laga dhaafayaa talada ah in ay masaaf 1 mitir ah isu jirsadaan marka ay lagama maarmaanka u tahay fulinta firfircoonda.
- Haddii ay carruur iyo dhallinyaro la tababbartaan naadi, koox ama wax la mid ah ku yaalla degmo kale, tartammada way kala qaybqaadan karaan naadigaas haddii ay xaaladda faafidda cudurku taas oggolaanayso.
- Naadiga ka jira degmo yar oo aan lahayn naadi kale oo uu la tartamo, waa aadi karaa degmada deriska la' ah si ay tartan uga qayb galaan ilaa iyo inta ay heerka cudurka ee degmooyinku isku mid yihiin. (Qodob cusub)
- Waxaa la isku boorrinayaa in firfircoonda dibedda lagu qabto intii gudaha lagu qaban lahaa.

#### **Ciyaaraha sare (qodob cusub)**

- Ciyaartoyda isboortiga sare sidii caadiga ahayd ayay ugu tababbaran karaan gudaha iyo dibeddaba.
- Waa la oggol yahay ciyaaraha tababbarashada ah ee dhammaan naadiyada horyaallada ciyaaraha sare oo uu ka mid yahay horyaalka Post-Nord. Ciyaaraha is-reebreebka waxaa la billaabaya saddex toddobaad kaddib marka la galo heerka 2-aad haddii khibradda laga helo ciyaaraha tababbarka iyo xaaladda faafidda cudurradu ay taas oggolaadaan. (Qodob cusub)

#### **Xeerar khuseeyaa dalka oo dhan**

#### **Qabanqaabooyin**

Waxaa la isku boorrinayaa taxaddar iyo in wax la sii qorsheeyo marka laga qaybqaadanayo qabanqaabooyinka si ilaa iyo inta suurtaggalka ah looga baaqsado in goobaha cudurka loo kala gudbiyo. Sida in aan la aadin

qabanqaabooyinka ka dhacaya degmo kale haddii aad ku nooshahay degmo uu cudurku ku badan yahay.

Xeerarka qabanqaabooyinku waa sida soo socota:

- Ugu badnaan 20 qof ayaa loo ogolyahay isu imaatannada gaarka ah ee ka dhaca meel gurigaaga ka baxsan, sida tusaale ahaan xaflad dhalasho oo ka dhacaysa gole la kireystay. Haddii dibedda la joogo waxaa la ahaan karaa ugu badnaan 30 qof. Carruurta xannaanooyinka iyo iskoollada ee ka wada tirsan koox joogto ah waa ay kulmi karaan, waxaana la joogi kara tiro dad waaweyn ah oo ku habboon in ay qabanqaabada isugu dubbaridaan. (Qodob cusub)
- Ugu badnaan 50 qof ayaa joogi kara qabanqaabooyinka guud ee gudaha ka dhaca ee aan lahayn goobo la fadhiisto oo dadka loo tilmaamayo, laakiin ilaa iyo 100 qof ayay noqon karaan haddii ay qabanqaabada isugu imaanayaan dad ka yar 20 sano oo isku degmo ah ama ay isku degmo ku tababbartaan. (Qodob cusub)
- Ugu badnaan 200 oo qof ayaa ka qaybqaadan kara qabanqaabada ka dhacaysa gudaha halkas oo dadku kulligood fadhiyaan goobo la fadhiisto, joogto ah oo loo tilmaamayo. (Qodob cusub)
- Ugu badnaan 200 oo qof ayaa ka qaybqaadan kara qabanqaabada ka dhacaysa dibedda, laakiin 600 oo qof (oo u kala qaybsan 3 kooxood oo joogto ah tiibana tahay 200 oo qof) haddii ay fadhiyaan goobo joogto ah oo loo tilmaamay ayna kooxuhu isu jiraan labo mitir.
- Qabanqaabiyaha ayaa looga baahan yahay in uu qaado tillabooyin lagu hubinayo in ay masaafaddii looga baahnaa isu jiraan ka qaybqaataayaasha aan isku guriga degganayn ee jooga qabanqaabo ay dadku fadhiyaan goobo joogto ah oo loo tilmaamay. Haddii laga maarmi waayana waxaa la isticmaalaya waardiyayaal si arrintaan loo hubiyo.
- Waxaa qabanqaabooyinka loo oggol yahay in ay khamriga u iibin karaan si la mid sida makhaayadaha.

**formaterte:** Engelsk (USA)

**Caweysyada, makhaayadaha iyo qabanqaabooyinka loo oggol  
yahay in ay khamri iibiyaaan**

- Wakhtiga joojinta gelitaanka- iyo iibinta khamrigu waa saacadda 24.00.  
Shardi ma aha in cunto la dalbado. (Qodob cusub)
- Shuruudda ka hortagga cudurrada: Diiwaangelin, tirada dadka soo gelaya oo la yareeyo iyo in ay kala fogaaadaan – gudaha iyo dibedda.